

$$66 + 20 = 86$$

REQUIRED CREDITS ELECTIVE CREDITS TOTAL CREDITS

Shuruudaha Dhibcaha Qalin-jebinta ee u Diyaargarowga Kulleejka iyo Shaqada (Lala billaabayo fasallada qalinjebinayo 2025)

SHURUUDAHA LA ISKA RABO EE QALIN-JEBINTA

Ka Socoto Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyo Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul

English Language Arts

16 dhibcood

4 dhibcood sanadkii x 4 sano

- 1 sano oo ah English fasalka 9-aad
- 1 sano oo ah English fasalka 10-aad
- 1 sano oo ah English fasalka 11-aad
- 1 sano oo ah English fasalka 12-aad

Social Studies

14 dhibcood

- 1 sano oo ah World History
- 1 Simistar oo ah Human Geography
- 1 sano oo ah U.S. History
- 1 Simistar oo ah Government
- 1 Simistar oo ah Economics

Math

12 dhibcood

4 dhibcood sanadkii x 4 sano

- 3 sano oo buuxa oo xisaab ah, oo ay ku jiraan Aljabra 1, Joometri, Aljabra 2 ama ka badan

Science

12 dhibcood

4 dhibcood sanadkii x 4 sano

- 1 sano oo ah Science
- 1 Sano oo ah Biology
- 1 Sano oo ah Chemistry ama Physics

Arts

Wadarta dhibcaha oo ah 4

- 2 Simistar oo ah Performing ama Visual Arts

Physical Education

Wadarta dhibcaha oo ah 2

- 1 Simistar oo ah Physical Education

Health

Wadarta dhibcaha oo ah 2

- 1 Simistar oo ah Health, Ind & Community

Career & Technical Education

Wadarta dhibcaha oo ah 2

- 1 Simistar oo ah koorsada Career and Technical Education

Critical Ethnic Studies

Wadarta dhibcaha oo ah 2

- 1 Simistar oo ah Critical Ethnic Studies

Electives/Fasallada Khiyaariga ah

Wadarta dhibcaha oo ah 20 ee 4 sano gudahood

FASALLADA KHIYAARIGA AH EE LAGU TALIYAY EE U DIYAARGAROWGA KOLLEJADA IYO SHAQADA XIRFADEYSAN

Math

4 dhibcood

4 dhibcood x 1 sano

Qaadashada fasallo dheeraad oo xisaabta ah ayaa lagu dhiirrigeliyaa ardayda kuwaasoo looga baahan yahay kolleejyo badan iyo barnaamijyo ah tababarka shaqada xirfadeysan.

Science

4 dhibcood

4 dhibcood x 1 sano

Qaadashada fasallo dheeraad oo sayniska ah ayaa lagu dhiirrigeliyaa ardayda kuwaasoo looga baahan yahay kolleejyo badan iyo barnaamijyo ah tababarka shaqada xirfadeysan.

Indigenous ama World Language

8 dhibcood

4 dhibcood x 2 sano AMA

Helidda Shahaadada luuqadaha ee la dhaho World Language Proficiency Certificate ama the Seal of Biliteracy (Gold ama Platinum)

Ma jiro wax ay u baahan tahay wasaaradda waxbarashada ee MDE oo ku aaddan luuqadda dadka Mareykanka Asalka ah ama luuqadaha adduunka, hayeeshee kullejyo badan ayaa u baahan ugu yaraan laba sano oo luuqadda dadka Mareykanka asalka ah ama luuqad caalami ah.

QIIMEYN

Marka loo eego Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (January 18, 2018), "Degmooyinka waxay leeyihiin shuruudo dhowr ah.

si loo fuliyo qorsheynta xirfadda shaqo iyo kulleejka ee ardayda kuwaasoo markii ugu horreysay iska diiwaan gelisay fasalka siddeedaad sannadkii 2012-13 iyo ka dib. Tan waxa ku jira in ardayda dhigato fasallada 11 iyo 12 la siiyo fursad ay kaga qaybgalaan imtixaanka kulleejyada ee heer qaran la aqoonsan yahay (ACT ama SAT) maalinta ay iskoolka joogaan." SPPS waxay hadda bixisaa ACT gu'ga sannad-dugsiyeed walba iyadoo maalintaas iskoolka la joogo.